



(Qofka u taga faaliye oo wax waydiiya salaad lagama aqbaloo afartan habeen)

Waxaa laga wariyey qaar ka mid ah haweenkii Nabiga scw inuu Nabigu yiri: (Qofka u taga faaliye oo wax waydiiya salaad lagama aqbaloo afartan habeen).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu scw wuxuu ka digayaa in loo tago faaliyaha -faaliyuhu waa magac guud oo ay wadaagaan wax sheega, xidigiyaha, faalka ciida, iyo wixii la mida, ee qaybka wax ka sheegiisa u daliishada wax yaabo hor dhac ah oo ay adeegadaan, in wax la waydiiyo kaliya ayuu Ilaahay uga xarimayaa qofka ajarka salaada afartan maalmood, waxaana loogu ciqaabay dambigaa wayn ee uu sameeyey awgeed.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5986>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

